



**Copyright: © 2007 Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye"**

**Printed: 302 pages**

**ISBN: 978-0-9550274-2-0**

**Publisher: Aftahan Publications**

**Edition: First edition**

**Language: Somaali**

Editors: Yasin Jama Nuh "Suldan", Martin Orwin, Mohamed H "Alto"

*Anigana hadhow iyo faallo  
Halistaa inaan ka afeestay  
Oo weliba hiif iga gaadhay  
Hagarlaawe, ii geli buugga!*

Taariikhda aan wax hilmaamin – Tixda Hagarlaawe, page 167

Waxa farxad noo ah in akhristayaasha suugaanta jecel ku wargelinno inuu soo baxay diiwaankii kaydka maansooyinka Abwaan. Maxamed Xaashi Dhamac "GAARRIYE" oo muddo dheer daabacaadda sugayey.

Diiwaankan oo ururintiisa la bilaabay 1994-kii, ku talo galkuna ahaa inuu isla sannadkaa soo baxo ayaa hadda uun nasiib u yeeshay inuu soo baxo. Dabayaaqadii labada kun iyo shantii (2005) ayaa abwaanka lagu soo casumay Xarunta Turjumada Maansada Dunida ee Jaamacadda SOAS (School of Oriental and African Studies). Isaga iyo shan qof oo kale oo ka kala socday dalalka Suudaan, Afganistaan, Hindiya, Indhooniisiya, Meksiko iyo Gaarriye oo ka socday Somaliland. Markii uu abwaanku Socdaalka suugaanta Dunida idlaystay, waxa u bilowday socdaal kale oo jaaliyadda Soomaalida ee deggen dalka Ingiriisku ay kula kulmayeen. Waxaana loo sameeyey kulamo tiro badan oo dalkoo dhan ka dhacay. Waxa markiiba isa soo taray xiisaha loo qabo in lala kulmo suugaanta abwaanka oo qoran.

Waxaana fursad weyn oo muhiim ah noo noqotay in aannu abwaanka socdaalkaas si gaar ah ugula kulanno si aannu wixii suugaan ah ee uu qoraal ku hayo uga reebno, si aannu mustaqbalka dhow buug uga dhigno. Waxaase nasiibwanaag noo noqotay oo aannu fursad u hellay buug dhammaystiran oo tixooyin dhowr ah mooyee, intii kale oo dhami ku urursan yihiin. Waa taa sababta nagu dhiirri gelisay in aannu diiwaankan qabyo-tirro, isla markaana ka dhigno buug, soona saarro. Waxaana fikradda noo rumeeyey shirkadda Dahabshiil oo kharashkii daabacadda buugga tuurta nooga ridatay, la'aanteedna aannu buuggani qabyo tirmeen.

Waxa ku urursan diiwaanka tixihii Gaarriye intoodii badnayd. Waxa diiwaanku koobayaa 48 tixood oo afar cutub u kala qaybsan. Waa tixo abwaanku curinayey in ka badan dhowr iyo soddon sano. Diiwaankani, waxa uu xambaarsanyahay maansooyin tiro badan, gudo fidsan, aragti fog, xeeldheeri iyo farshaxan aqoon ku dhalatay. Waa maansooyin colaad iyo nabadba wax ka tidhi. Waa maansooyin nacayb iyo jacayl ka hadlay. Waa maansooyin jabhadayn iyo jamhuuriyadaynba ka qayb qaatay. Waa maansooyin caalamka iyo cibaarooyinka ka dhacay ka tixooday. Waa maansooyin dareen, aqoon, waayo-aragnimo, falsafad, siyaasad iyo shucuur waddaniyeed ka dabqaadanaya.

Diiwaankan Hagarlaawe waxa lagu ururiyey maansooyinkii ugu badnaa oo abwaanku allifay. Inkastoon la odhan karin way ku dhan yihiin, haddana xilliga hadda la joogo intii ugu badnayd ee la heli karayey ayaa lagu kaydiyey.

Diiwaanka Hagarlaawe, waxa lagu gardaadinayaa Dabaaldega Toddobaadka Soomaalida (Somali Week Festival) oo ka dhacaya Xarunta Oxford House, 20 – 28 October 2007. Ha moogaan inaad heshid Hagarlaawe!

Yaasiin Jaamac Nuux (Suldaan)

Suldaan@aftahan.com | aftahan@gmail.com